

# Baasaboorka koronuhu waa caddeynta koronaha



[Waa maxay baasaboorka koronuhu?](#)

[Halkeen ka heli karaa baasaboorka koronaha?](#)

[Halkeen ka heli karaa baasaboorka koronaha haddii anan isticmaali karin omakanta?](#)

[Tallaalka koronaha macluumaadkayga khuseeya waxaa ku jira khaladaad, sideen u sixi karaa?](#)

[Caddaynta koronaha ee tallaalada waddan dibad ah laga helay](#)

[Sideen u heli karaa caddeynta baadhitaanka ee an safarka ugu baahanahay?](#)

## Waa maxay baasaboorka koronuhu?


Baasaboorka koronaha waxaa looga baahanyahay dadka ka wayn 16 sano si ay u tagi karaan goobaha iyo dhacdooyinka kala duwan.

Waxaad heli kartaa baasaboorka koronaha marka,

- ad qaadatay labo tallaal oo koronaha ah **ama**
- ad qaadatay hal tallaal xanuunkana ad hore u soo qaaday **ama**
- ad ka heshay natiijo negatíf ah baadhitaan koronaha ah oo ad iska qaaday ugu badnaan 72 saacadood gudahood **ama**
- ad 6-dii bilood ee u dambaysay yeelatay xanuunka koronaha oo lagu caddeeyay shay baadh.

Baasaboorka koronaha waxaa kuu ah caddaynta koronaha ee [Omakanta](#) laga soo dajjisto ee ah baasaboorka koronaha ee Midowga Yurub. Wuxuu kaasi ka koobanyahay saddex caddeyn oo kala duwan::

- caddeynta tallaalka koronaha
- caddeynta natiijada baadhitaanka koronaha iyo
- caddeynta xanuunka fayruska koronaha ee hore loo soo qaaday



Caddeymaha Midowga Yurub ee koronaha waxa kaloo lagu isticmaali karaa wakhtiga laga gudbayo xuduudaha Midowga Yurub ku dhex yaalla. Musaafirka waxaa laga raba in uu isagu soo xaqiijiyo waxyaabaha laga rabo qofka u safraya waddanka uu u socdo (waa tee caddaynta Midowga Yurub ee laga rabo waddanka uu u safrayo xuduuddiisa marka uu ka gudbayo).

### **Halkeen ka helayaa baasaboorka koronaha?**


Baasaboorka koronaha oo ah caddaynta koronaha waxaad ka heli kartaa Omakanta..

1. Adeegga Omakanta ee internetka ah ka gal cinwaanka [omakanta.fi](https://omakanta.fi). Inaad gudihiisa gasho waxaad ugu baahantahay macluumaadka bankiga internetka laga isticmaalo ama xaqiijinta taleefanka.
2. Ka dooro doorashada bidixda kaa xigta Koronatodistus.
3. Fur baasaboorka koronaha adiga oo riixaya linkiga pdf-ka ah. Haddii caddeynta ad haysato waxaay kaaga furmaysaa bogga cusub.
4. Ku kaydi pdf-ka taleefankaaga. Caddaynta warqad ayaad xataa ku daabacan kartaa.

Caddaynta tallaalku waxaay ka muuqataa Omakanta shan maalin gudaheed marka ad taallaalka heshay. Natiijada baadhitaanka waxaa caadiyen la helaa hal maalin kaddib marka ad baadhitaanka iska qaaday. Caddaynta xanuunku waxaa la helaa marka 11 maalmood ay ka soo wareegto natiijada boositiifka ah.

### **Halkeen ka heli karaa baasaboorka koronaha, haddii anan Omakanta isticmaali karin?**

Haddii fursad anad u haysanin in aad isticmaasho Omakanta, waxaad caddeynta koronaha heli kartaa marka ad tagto goobta caddeynta koronaha ee Frenkell ku taalla (Frenkellinaukio 2 B, Tampere). Goobtaas waxaay furantahay isniin-jimce saacadda 9–16. Xasuuso in aad soo qaadato aqoonsi sawir leh. Waxa kalood caddaynta ka heli kartaa xaruntaada caafimaadka ama daryeelka caafimaadka ardeyda ee Tullinkulma.



Maktabyada iyo Tietotoritka waad kaga soo daabacan kartaa caddeynta koronaha (0,30 oo yuuro/daabacaadda), haddii ad gali karto Omakanta, laakiin guriga aanu kuu oollin mashiinka daabacaaddu.

### **Tallaalka koronaha macluumaadkayga khuseeya waxaa ku jira khalad, sideen u sixi karaa?**

Haddii Omakanta macluumaadkaaga ku jira ee tallaalka khuseeya uu ku jiro wax khalad ah ama ay ka maqanyihiin macluumaadka tallaalka ad hore u heshay waxaad ka codsan kartaa in lagu saxo xaruntaada caafimaadka ama lambarka la talinta adeegyada caafimaadka oo ah 03 5657 0023 (maalin kasta saacadda 7–22). Haddii ad tallaalka ka heshay dagmo anan ahayn Tampere ama Orivesi, ka codso degmadaas in lagaaga soo saxo.

### **Caddaynta koronaha ee talaallada waddan dibad ah laga helay**

Haddii ad tallaalkaaga koronaha ka heshay waddan kale oo Midowga Yurub ka tirsan, waa in aad caddayn ka codsataa waddankaas ad tallaalka ka heshay.

### **Miyaad tallaalka koronaha ku qaadatay waddan ka baxsan Midowga Yurub?**


Haddii ad tallaalka koronaha ku qaadatay waddan heshiis kula jira Midowga Yurub oo caddayn elektroonig ah oo wadajir ah lala leeyahay, waa in aad caddaynta ka codsataa waddankaas.

Waddamadaas waxaa ka tirsan:

- Albania, Andorra, Armenia, Jaziiradaha Fär, Aysland, Israel, Liechtenstein, Maroko, Monaco, Norway, Panama, Makedoniada Waqooyiga ah, San Marino, Swizerland, Turki, Ukrayniya, Dowladda Fatikaanka iyo Iskutagga Boqortooyada (UK)

**Haddii tallaalka koronaha ad ka qaadatay waddan ka baxsan Midowga Yurub oo anan anan lahayn heshiiska caddaynta koronaha ee elektrooniga ah, waxaad heli kartaa caddaynta**

**Midowga Yurub ee koronaha haddii shardiyada ad buuxiso.** Fiiro gaar ah u yeelo in caddaynta koronaha ee Midowga Yurub la siin karo oo kaliya tallaalka komishinka Midowga Yurub uu u oggolaaday in la iibiyo ama ku jira liiska isticmaalka degdegga ah ee WHO:: [THL: Tallaalka koronaha ee Finland lagu aqbalo.](#)



Si ad caddaynta u shego **waa in aad si shaqsii ah u tagtaa goobaha lagu macaamilo** (ma heli kartid caddaynta haddii ad tusaale ahaan iimayl kula xidhiidho):

- Haddii ad tahay muwaadin Finnish ah oo ku nool waddan dibad ah, soo wayddiiso caddaynta koronaha degmada ad ka guurtay markaad dibadda u guuraysay.
- Goobta caddaynta koronaha ee Tampere (Frenckellinaukio 2 B) waxaa lagu samayn karaa caddaymaha koronaha ee dadka ka yimidday waddan ka baxsan Midowga Yurub laakiin muddo dheer u soo degay Tampere ama Orivesi oo u jooga tusaale ahaan waxbarasho ama shaqo ama sababo kale. Dadka musaafiriinta ah ama dadka si kale muddo gaaban u joogaya Finland caddaynta lama siinayo.

Isku diyaari inaad caddayso shaqsiyaddaada adiga oo muujinaya aqoonsi sharci ah soona qaado dhammaan caddaymaha loo baahanyahay, sida caddaynta tallaalka koronaha ee waddan Midowga Yurub ka baxsan lagugu siiyay iyo sababta waddanka ad u joogayso muddo dheer. Caddaynta la oggolyahay ee joogitaankaaga caddaynaysa waxaay noqon kartaa caddaynta shaqada ama booska waxbarashada ee shaqobixiyahaaga ad ka hesho.

Haddii ad imika uun ka so guurtay Tampere, xasuuso inaad samayso ogaysiiska guuritaanka si macluumaadkaaga saxda ah ay uga muuqdaan nidaamka diwaanka shicibka ee dalka.

### **Sideen u heli kara caddeynta baadhitaanka ee an safarka ugu baahanahay?**

Baadhitaanada koronaha ee la samaynayo si Finland waddan dibad ah looga safro waxaa lagu sameeyaa daryeelka caafimaadka ee gaarka loo leeyahay ah. Baadhitaanadaas koronuhu waa kuwo lacag ah. Sidoo kale meelaha gaarka loo leeyahay ee baadhitaanka koronaha lagaaga qaado caddaynteeda Midowga Yurub waa laga helaa Omakanta.

